

Maxamed Dheere " Diida Ama Ha Diidina Nuur Cade Daab Al-Shabaab Ayaa Ku Jura

Wednesday, 15 October 2008

Muqdisho: Guddoomiyihii xilka laga qaaday ee maamulkii hore ee gobolka Banaadir Maxamed Cumar Xabeeb Maxamed Dheere ayaa ka dhawaajiyey in Nuur Cadde uu xiriir wada shaqeyneyd la leeyahay koox diimeedka Al-shabaab oo u dhagrayo dawlada u madaxda u yahay.

Maxamed Dheere oo u waramayey warbaahinta Muqdisho ayaa sheegay in xiriirka ka dhexeeya Al-shabaab iyo Nuur Cadde uu yahay mid muuqda oo aan qarsooneyn oo dareen iyo xog fiican laga hayo, waxaana waxyaabaha daliisha noqonkara ka mid ah lama duqeeyo marka uu garoonka ka soo dagayo oo si nabad ah ayuu garoonka uga soo dagaa ugana duulaa, ayu Maxamad Dheere warkiisa raaciyey

Maxamed Dheere wuxuu intaas si raaciyey in xiriirka ka dhexeeya urur diimeedka Al-shabaab iyo Nuur Cadde uu yahay mid soo jireen ah oo bilowday markii uu xilka Ra'isal-wasaarnimada qabtay.

Hadalka Maxamed Dheere oo aan aheyn mid cusub ayaa ku soo beegmaya xilli ay dadweynaha Mogdisho uu ka jiro shaki la xiriira sababaha aan loo duqeyn Ra'isuwasaaraha marka uu garoonka ka duulayo iyo marka uu soo dagayaba.

Sida la wada ogsoonyahay in badan ayaa beesha Reer Mataan Celi ee Nuur cade ka soo jeedo u dhigteen gogol sii Nuur Cade uga gar baxo Eedeeynta lagu sheegay inu maxkamadaha iyo al-shabaab taageersanyahay, hasa-ahaate Mr. Nuur Cade arintaas waxuu ku tilmaamay mid aan raad lahayn oo lola jeedo isku dir madaxeed.

Galdogob Times News Desk